

QIIMAYNTA DIYAAR U AHAANSHAHA DUGSIGA XANAANADA OHIO

Macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo:
WWW.EDUCATION.OHIO.GOV/KRA

Waa ayo?

Qiimaynta Diyaar u Ahaanshaha Dugsiga Xanaanada Ohio waxa loogu talagalay dhammaan carruurta dhigata dugsiyada bulshada ama dadwaynaha. Waxaa sidoo kale loogu talagalay qaar kamid ah dugsiyada aan kuwan ahayn ee ka qaybqaadanayana.

Waa maxay

Qiimayntu waxay cabbirtaa aqoonta iyo kartida ilmahaaga ee afar meelood: xirfadaha bulsheed, luuqadda iyo akhriska/ qorista, xisaabta, iyo faydaqabka jidheed iyo koboca dhaqdhaqaaqa.

Qiimaynta waxa laga duulayaa waayo-aragnimadii hore ee ilmahaaga waxayna siinaysaa macluumaad qoyskaaga, iyo sidoo kale macallinka ilmahaaga, taasi oo loo isticmaali doono in lagu caawiyo ilmahaaga inuu wax barto oo uu koro.

Waa goorma?

Qiimayntu waxay bilaabaynaysaa marka ilmahaagu galo dugsiga xanaanada. Macallimiinta dugsiga xanaanada Ohio waxay haystaan laba toddobaad kahor maalinta koowaad ee dugsiga ilaa Noofambar 1, si ay u dhammaystiraan Qiimaynta Diyaar u Ahaanshaha Dugsiga Xanaanada

Sabab?

Marka qiimayntu dhammaato, waxay macluumaadka haystaan warbixin ay la wadaagaan qoysaska. Macluumaadku wuxuu ka caawin doonaa qoysaska iyo macallimiinta inay ka wada-shaqeeyaan guulaysiga carruurta ee dugsiga.

Sidee?

Waxa jira saddex qaab oo carruurta u muujin karto waxa ay yaqaanaan ee ay qaban karaan. Saddexda qaab waa:

1. Doorashada jawaabta su'aal.
2. Qabashada hawl la codsaday.
3. Inuu macallinku ka warhayo inta dugsiga la joogo iyo wakhtiga nasashada.



QIIMAYNTA DIYAAR U AHAANSHAHA DUGSIGA XANAANADA OHIO

Macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo:
WWW.EDUCATION.OHIO.GOV/KRA

Waa ayo?

Qiimaynta Diyaar u Ahaanshaha Dugsiga Xanaanada Ohio waxa loogu talagalay dhammaan carruurta dhigata dugsiyada bulshada ama dadwaynaha. Waxaa sidoo kale loogu talagalay qaar kamid ah dugsiyada aan kuwan ahayn ee ka qaybqaadanayana.

Waa maxay

Qiimayntu waxay cabbirtaa aqoonta iyo kartida ilmahaaga ee afar meelood: xirfadaha bulsheed, luuqadda iyo akhriska/ qorista, xisaabta, iyo faydaqabka jidheed iyo koboca dhaqdhaqaaqa.

Qiimaynta waxa laga duulayaa waayo-aragnimadii hore ee ilmahaaga waxayna siinaysaa macluumaad qoyskaaga, iyo sidoo kale macallinka ilmahaaga, taasi oo loo isticmaali doono in lagu caawiyo ilmahaaga inuu wax barto oo uu koro.

Waa goorma?

Qiimayntu waxay bilaabaynaysaa marka ilmahaagu galo dugsiga xanaanada. Macallimiinta dugsiga xanaanada Ohio waxay haystaan laba toddobaad kahor maalinta koowaad ee dugsiga ilaa Noofambar 1, si ay u dhammaystiraan Qiimaynta Diyaar u Ahaanshaha Dugsiga Xanaanada

Sabab?

Marka qiimayntu dhammaato, waxay macluumaadka haystaan warbixin ay la wadaagaan qoysaska. Macluumaadku wuxuu ka caawin doonaa qoysaska iyo macallimiinta inay ka wada-shaqeeyaan guulaysiga carruurta ee dugsiga.

Sidee?

Waxa jira saddex qaab oo carruurta u muujin karto waxa ay yaqaanaan ee ay qaban karaan. Saddexda qaab waa:

1. Doorashada jawaabta su'aal.
2. Qabashada hawl la codsaday.
3. Inuu macallinku ka warhayo inta dugsiga la joogo iyo wakhtiga nasashada.



TALOYINKA QOYSKA

QAABABKA AY QOYSASKU U TAAGEERI KARAAN BARASHADA CARRUURTOODA DUGSIGA XANAANADA

XIRFADAHA BULSHADA

- Kala hadal ilmahaaga sida uu dareemayo—aqoonsado oo qiimee dareenadaas. Ka caawi ilmahaaga erayada si uu u muujiyo dareenkiisa, sida murugada, farxadda ama cadhada.
- Sasab ilmahaaga marka uu kacsan yahay ama cabsanayo. Ka caawi ilmahaaga inuu aqoonsado marka dadka kale muujinayaan dareenkooda iyo sida loo dejiyo.
- La samee caadaysiyo ilmahaaga, sida wakhti ciyaar, wakhti nadiifin, wakhti hurdo iyo wakhti sheeko.
- Sii ilmahaaga tilmaamo "sahlan". Ku bilaw shay ilmahaagu ku qaban karo hal tallaabo ama laba kadibna kordhi tallaabooyinka mar kasta oo ilmuhu ka soo baxo tallaabooyinka hore.

FAYOQABKA JIDHEED IYO KOBACA DHAQDHAQAAQA

- Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu isagu labbisto. Ka caawi ilmahaaga inuu barto inuu jinyeedhka xidho, isku dhajiyo ama baldhamada koodhka xidho iyo inuu xidho xargaha kabaha.
- Ka caawi ilmahaaga inuu barto sida la isku daryeelo, sida maydhashada gacmaha kahor cuntada iyo kadib musqusha.
- Sii wakhti ilmahaaga uu ku ciyaaro maalin kasta - oo uu ordo, lug ku boodo, boodo, baaskiil fuulo, oo kubbadda ciyaaro.
- Kala hadal ilmahaaga badbaadada, sida ka gudbidda jidka.

LUUQADDA IYO AKHRISKA/ QORISTA

- Inta badan ilmahaaga wax ugu akhri, luuqadda aad sida fiican u taqaan.
- Heeso la qaad ilmahaaga—la qaadista ilmahaaga erayada aan macnaha lahayni waa muhiim!
- Ka caawi ilmahaagu inuu aqoonsado magaciisa oo qoran iyo in xarfuhu sameeyaan erayo oo erayaduna sameeyaan macne.
- La hadal oo wada-hadla ilmahaaga. Ka caawi ilmahaagu inuu barto sida loo muujiyo fikradaha iyo aragtiyaha iyada oo mawduuca lagu joogayo.

XISAABTA

- Ka caawi ilmahaagu inuu aqoonsado qaababka, sida goobooyinka, afar-geeska iyo saddex xagallada. Raadi oo tilmaan qaababka deegaanka ka muuqda.
- Kala hadal ilmahaaga macnaha erayada lagu isticmaalo xisaabta, sida tirooyinka, u gee, ka jar, la mid ah, ka badan iyo ka yar.



TALOYINKA QOYSKA

QAABABKA AY QOYSASKU U TAAGEERI KARAAN BARASHADA CARRUURTOODA DUGSIGA XANAANADA

XIRFADAHA BULSHADA

- Kala hadal ilmahaaga sida uu dareemayo—aqoonsado oo qiimee dareenadaas. Ka caawi ilmahaaga erayada si uu u muujiyo dareenkiisa, sida murugada, farxadda ama cadhada.
- Sasab ilmahaaga marka uu kacsan yahay ama cabsanayo. Ka caawi ilmahaaga inuu aqoonsado marka dadka kale muujinayaan dareenkooda iyo sida loo dejiyo.
- La samee caadaysiyo ilmahaaga, sida wakhti ciyaar, wakhti nadiifin, wakhti hurdo iyo wakhti sheeko.
- Sii ilmahaaga tilmaamo "sahlan". Ku bilaw shay ilmahaagu ku qaban karo hal tallaabo ama laba kadibna kordhi tallaabooyinka mar kasta oo ilmuhu ka soo baxo tallaabooyinka hore.

FAYOQABKA JIDHEED IYO KOBACA DHAQDHAQAAQA

- Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu isagu labbisto. Ka caawi ilmahaaga inuu barto inuu jinyeedhka xidho, isku dhajiyo ama baldhamada koodhka xidho iyo inuu xidho xargaha kabaha.
- Ka caawi ilmahaaga inuu barto sida la isku daryeelo, sida maydhashada gacmaha kahor cuntada iyo kadib musqusha.
- Sii wakhti ilmahaaga uu ku ciyaaro maalin kasta - oo uu ordo, lug ku boodo, boodo, baaskiil fuulo, oo kubbadda ciyaaro.
- Kala hadal ilmahaaga badbaadada, sida ka gudbidda jidka.

LUUQADDA IYO AKHRISKA/ QORISTA

- Inta badan ilmahaaga wax ugu akhri, luuqadda aad sida fiican u taqaan.
- Heeso la qaad ilmahaaga—la qaadista ilmahaaga erayada aan macnaha lahayni waa muhiim!
- Ka caawi ilmahaagu inuu aqoonsado magaciisa oo qoran iyo in xarfuhu sameeyaan erayo oo erayaduna sameeyaan macne.
- La hadal oo wada-hadla ilmahaaga. Ka caawi ilmahaagu inuu barto sida loo muujiyo fikradaha iyo aragtiyaha iyada oo mawduuca lagu joogayo.

XISAABTA

- Ka caawi ilmahaagu inuu aqoonsado qaababka, sida goobooyinka, afar-geeska iyo saddex xagallada. Raadi oo tilmaan qaababka deegaanka ka muuqda.
- Kala hadal ilmahaaga macnaha erayada lagu isticmaalo xisaabta, sida tirooyinka, u gee, ka jar, la mid ah, ka badan iyo ka yar.

